

ISTICMAALKA

DAROOGOYO BADAN (PSU)

Isku darka daroogooyinka waa khatar nafta halis gelin karta.

Isticmaalka Daroogooyin Badan (PSU) waxaa loola jeedaa isticmaalka in ka badan hal daroogo ama walax, ha noqoto isku mar ama midba midka kale ka dambeeya. Haddii si ula kac ah ama si kama' ah loo sameeyo, isku darka daroogooyinka kala duwan mar walba waa arrin khatar ah. Wax farqi ah ma leh haddii ay yihiin dawooyin dhakhtar kuu qoray ama daroogooyin sharci-darro ah.

HELITAANKA FUDUD WAA ARRIN MUHIIM AH

- + Saamaynta daroogooyinku waxay noqon kartaa mid aan la saadaalin karin.
- + Falcelintu waxay ka xoog badnaan kartaa intii la filayay
- + Khatarata overdose-ka aad bay u sii kordhaysaa
- + PSU waxay si kama' ah u dhici kartaa marka kiniinno been-abuur ah ama daroogooyinka waddooyinka lagu iibiyo lagu dhex qaso fentanyl ama xylazine (tranq).

FENTANYL KHATARTA QARSOON

Maalmahan, daroogooyin badan oo waddooyinka lagu iibiyo, oo ay ku jiraan kiniinno been-abuur ah, waxaa lagu dhex daraa fentanyl. Taasi waxay ka dhigaysaa isticmaalka daroogooyin badan oo si kama' ah u dhacaya dhibaato weyn. Qofku wuxuu u malayn karaa inuu hal daroogo oo keliya qaadanayo, laakiin dhab ahaantii wuxuu qaadan karaa isku-dar daroogooyin ah oo ay ku jiraan qaddar fentanyl ah oo halis ah oo dili kara.

Mar walba u diyaar garow xaalad overdose ah, oo qaado naloxone si aad naf u badbaadiso.

